



# Edgemoor

**Xarunta Kalkaalinta Xirfadda Leh ee Aagga Gaarka ah**

**655 Park Center Drive  
Santee, CA 92071  
Taleefanka (619) 596-5500**

## **Ku saabsan Edgemor**

Edgemor waa xarun daryeel oo takhasus leh oo shatiyeysan taas oo bixisa daryeelka caafimaadka ee xirfadeysan iyo adeegyada baxnaaninta ee muddada dheer. Iyada oo ay joogaan koox xirfadleyaal ah oo bixiya daryeel caafimaad, Edgemor waxay diiradda saartaa kor u qaadida tayada noloshaha ee dadka deegaanka iyadoo loo marayo daryeel la shakhsiyeeyay, hawlo dadka laga qaybgelinayo, iyo jawi bulsho oo taageero leh.

Edgemor waa xarun qaran ahaan loo aqoonsan yahay, abaalmarin ku guulaysatay, oo heer sare ah taas oo si isdaba joog ah loo aqoonsaday inay tahay mid ka mid ah guryaha daryeelka ee ugu darajada sareeya dalka ilaa muddo toban sano ah.

## **U Oggolaanshaha Dhigista Xarunta iyo U-qalmidda**

Iyadoo sabab u ah daryeelka gaarka ah ee Edgemor ay bixiso, inta badan u ogolaanshaha qofka in la dhigo xarunta inta badan waxay toos uga timaadaa isbitaal daryeel ama isbitaalka dhirirka ee ba'an.

Dhammaan dadka deggan Edgemor waa dad waaweyn oo da'doodu tahay 18+ kuwaas oo u baahan daryeel heer sare ah iyo tiro badan oo shaqaale ah marka loo eego xarumaha kale ee dadka lagu daryeelo sababo la xiriira baahiyahooda oo adag. Inta badan dadka deegaanka ah waxay u baahan yihiin daryeel saacad kasta ah oo dadka intooda badani waxay ku nool yihiin Edgemor inta ka hartay noloshooda.

## **Adeegyada La Bixiyo**

- Caawimaad ku aadan hawlaha nolol maalmeedka, sida wax cunista, daryeelka shaqsiyeed, dhaqdhaqaaqa, iyo qaadashada daawooyinka
- Adeegyada baxnaaninta ee xirfadaysan, sida daaweynta/teerabiyada jireed, shaqo, iyo hadalka
- Maareynta kiisaska caafimaadka
- Korjoogteynta Cunnooyinka Khaaska ah
- Waxqabadyada maalinlaha ah iyo barnaamijyada madadaalada

## **Wax Badan Baro**

Iskaan ka qaad QR koodhka ama booqo [bit.ly/edgemoor-dpsnf](https://bit.ly/edgemoor-dpsnf) si aad u aragto Su'aalaha Inta Badan La Isweydiiyo.



**LIVE WELL  
SAN DIEGO**